

MOSAIC

TRANSLATION SERVICES

1522 COMMERCIAL DR., VANCOUVER, B.C. CANADA V5L 3Y2

TEL: 604-254-0469 • TOLL FREE: 1-877-475-6777 • FAX: 604-254-2321 • WWW.MOSAICBC.COM

TURJUMAADDA GAAR AHAANEED

Adeegyada la helo

Caadi: 5 maalmood oo shaqo
Deg deg: 2 maalmood oo shaqo ugu yaraan

Qiimaha Turjumaadda

Sicirka turjumaaddu wuxuu ku xiran yahay nooca aad doonaysid iyo tirada kalmadaha ingiriiska

| ADEEGYADA CAADIGA AH | | ADEEGYADA DEG DEGGA AH | |
|----------------------|------------------|------------------------|------------------|
| TIRADA KALMADAHA | SICIRKA | TIRADA KALMADAHA | SICIRKA |
| 1-125 kalmadood | \$35.00 | 1-125 kalmadood | \$50.00 |
| 126-210 kalmadood | \$40.00 | 126-210 kalmadood | \$60.00 |
| 211- + kalmadood | \$0.20/kalmaddii | 211- + kalmadood | \$0.30/kalmaddii |

Siciradani ma khuseeyaan turjumidda waraaqaha ganacsiga ama shirkadaha. Qiima saa'ida ayaa raaca afafka an ku salaysnayn alfabeetada Roomanka sida (shiinayska, jabbaanayska, kooriyaanka, iwm). Qiimaha warqadda asalka ah waa \$40.00 halkii bog ama ka badan ayadoo ku xiran adkaanshaha habaynta.

Waxa la sameeyo markaad u baahan tahay turjumaad

Markaad codsanaysid adeegyada turjumaadda waraaqaha nidaamka caadiga ah oo la raaca waa sidan:

Warqadahaaga keen waaxda turjumidda MOSAIC oo ku taal cinwaanka soo socda:

Dabaqa 2aad - 1522 Commercial Dr.

Vancouver, B.C., V5L 3Y2

Taleefonka: (604) 254-0469

Saacadaha shaqada: Isniinta 9:00 am - 6:00 pm

Talaadada - Jimcaha 9:00 am - 5:00 pm

Shaqaalaha ayaa adeegga macmiisha ayaa waxa uu ku siin doonaa qiima ku meel gaar ah oo ku salaysan qiyaasta tirada kalmadaha ingiriiska. Fadlan xusuusnow in qiimaha kama dambaysta ahi ku xirnaan doono tirada runta ee kalmadaha ingiriiska ee turjumaadda, sidaa awgeedna qiimuhu ka badnaan karo intii la qiyaasay. Haddii ad go'aansatid in lagu turjumo warqadahaaga, waxaa lagu waydiin doonaa inaad dabaaji ahaan uga tagtid 65% qiimaha la qiyaasay turjumaadda. Waxaad ku bixin kartaa caddaan, Visa, MasterCard, ama Kaarka Bangiga (Interac). Waxaa lagu siin doonaa cadayn muujinaysa dabaajigii aad u bixisay turjumaadda (intii ad bixisay, taariikhda iyo waqtiga qaadashada, sicirka khuseeya turjumaadda, iwm).

Haddii aadan si ka duwan u codsan, turjumaadda kama dambaysta ahi waxay noqanaysaa mid la tasdiiqiyay, kuna daabacan warqadda waaxda turjumaadda MOSAIC ayna la socoto nuqul(koobbi) warqaddaadii hore iyo cadaynta turjumaanka oo saxiixan oo xaqiijinaysa sax ahaanta turjumaadda.